## Ku soo dhawoow Farmashiyaha Adeegyada Farmashiga Taqasuska ee HCMC!

Kooxdeena ayaa si dhow ula shaqeyn doona adiga iyo dhakhaatiirtaada si lagaaga caawiyo inaad guul ka gaarto daawayntaada cusub. Galkaan soo dhawaynta ah ayaa sharxaaya qaar badan oo kamid ah adeegyada aan bixino anagoo ah farmashiyahaaga taqasuska iyo anagoo qayb ka ah Farmashiyaha Adeegyada Farmashiga Taqasuska ee HCMC.

Adeegyadeena waxaa loo sameeyay inay kaa caawiyaan inaad guul ka gaarto dheefta ugu wayn ee aad ka helayso baxnaanintaada ayna ku jiraan:

- Daryeelka gaarka ah
    - Waxaad heli doontaa koox farmashiisteyaal ah oo haysta tababar taqasus iyo xubnaha shaqaalaha farmashiyaha kuwaasoo khibrad u leh xanuunkaaga.
- Baaritaanka Dheefta iyo Taageerada Dhaqaalaha
    - Waxaan kala shaqeyn doonaa shirkadaada caymiska ansixinta daawooyinkaaga waxaana baari doonaa barnaamijyada kala duwan ee caawimaada dhaqaalaha oo aad helayso kuwaas oo hoos u dhigi kara qarashaadka aad jeebka ka dhiibayso.
- Gaynta bilaash ah oo badqab leh, laguna gaynaayo wakhtigeedii
    - Farmashiyuhu wuxuu mudeyn doonaa uuna si dhakhso ah kuugu soo diri doonaa daawooyinkaaga taqasuska – xataa kuwa u baahan maareyn gaar ah, sida talaagad gelinta.
- Taageerada saacad kasta, 24/7
    - Farmashiisteyaasha ayaa la heli karaa 24 saac maalintii, 7 maalmood isbuucii ayna ku jiraan maalmaha fasaxa iyo dhammaadka asbuuca si aan uga jawaabno dhammaan su'aalahaaga quseeya daawooyinkaaga iyo xanuunkaaga.
- Xasuusinnada Dib u Buuxinta
    - Farmashiyaha ayaa kula soo xiriiri doona si joogto ah si uu kuugu mudeeyo dib u buuxintaada xigta uuna u hubiyo hormarka laga gaaray daawayntaada.

Waxaan ku dedaalaynaa inaan buuxino baahiyahaaga adoo helaaya qanaaco buuxda. Mararka qaar, waxaa lagaa codsan karaa inaad buuxiso xog uruurinta qanaacada bukaanka ee lagu diro fariin qoraal ama iimeyl. Fadlan tixgeli inaad daqiiqado yar geliso si aad noogu sheegto heerkeena adeegga. Muhiim ayay noo tahay waana kaaga mahad celinaynaa fikirkaaga.

Waad ku mahadsan tahay inaad noo dooratay inaan noqono farmashiyahaaga taqasuska waxaana kugu dhawaynaynaa Adeegyada Farmashiga Taqasuska ee HCMC!

Daacadnimo,
Kooxda Farmashiyaha Adeegyada Taqasuska ee HCMC

**Mawduucyada Galka:**

- Galka Soo Dhawaynta
- Heerarka Adeeg Bixiyaha ee CMS DMEPOS
- Diiwaanka Xiriirka iyo Cabashada
- Xeerka Xuquuqaha iyo Masuuliyadaha Caafimaadka ee Bukaanka – Buug Xogeed
- Ogaysiiska Maaraynta Xogta Sirta ah – Buug Xogeed
- Dardaraannada Hore ee Caafimaadka – Buug Xogeed
- Bixinta Dheefaha – Waxay u Baahan tahay Saxiix
- Damaanadda Qalabka DMEPOS – Waxay u Baahan tahay Saxiix

# MACLUUMAADKA XIRIIRKA

**Saacadaha Shaqada:**

- Isniinta – Jimcada, 7 am ilaa 5:00 pm
- Sabtida iyo Axadda, Way Xiran tahay
- Farmashiyaha ayaa xirnaan doona fasaxyada soo socda:
    - Maalinta Sanadka Cusub
    - MLK
    - Maalinta Xuska Ciidamada
    - Luuliyo 4teeda
    - Maalinta Shaqaalaha
    - Maalinta Mahadnaqa
    - Maalinta Ciida Kiristaanka

**Macluumaadka Xidhiidhka:**

- Deegaanka: 612-873-2070
- Kadib Saacadaha Shaqada: 877-993-3344
- Fakis: 612-873-3312
- Iimeylka: hhsspecialtypharmacy@hcmed.org
- Webseetka: Hennepin Healthcare.Org/Pharmacy
- Ciwaanka: Purple Building Level 1 716 South 7th Street Minneapolis, MN 55415

**Marka ay Tahay In Aad nala soo Xiriirto:**

- Haddii aad qabto su'aalo ama walaacyo la xiriira daawooyinkaaga
- Haddii aad ka shakido xasaasiyad ama alarji ka dhashay daawooyinkaaga ama cilado kale
- Haddii aad dhibaato xun ka qaado daawo
- Si aad u soo sheegto cilad dhanka daawada la xiriirta
- Haddii isbadel ku dhaco isticmaalkaaga daawada
- Haddii xogtaada xiriirka ama ciwaanka la gaynaayo daawada uu isbadello
- Si aad u ogaato meesha uu marayao dalab ama aad u soo sheegto dib u dhaca gaynta dalabka
- Haddii xogtaada caymiska ama isha lacag bixintu isbadesho
- Si aad u hubiso marxalada dalabkaaga, uga hadasho dib u dhaca dalabka ama dib ugu dhigto gaynta dalabkaaga
- Si aad u hesho xog la xiriirta sheegashooyinka
- Si aad u hesho dib u buuxinta daawada laguu qoray
- Si aad xog uga ogaato dookhyada qiimaha ama barnaamijyada kaydadka ee daawaada
- Si laguugu wareejiyo daawad alaguu qoray

# XOGTA MUHIIMKA AH

- **Barnaamijyada Maareynta Bukaanka**
  - Barnaamijyada Maareynta Bukaanka ee Adeegyada Farmashiga Taqasuska ee HCMC ayaa ka caawiya bukaanadeena inay gaaraan natiijooyinka ugu wanaagsan ee ay ka helayaan daawayntooda daawada baxnaaninta. Waxaan ka caawinaa bukaanka iyo dhakhtarka inuu maareeyo qarashaadka. Waxaan bixinaa hanaanka diirada saaraaya bukaanka oo bixiya hanaannada cadeynta ku dhisan ee mid kasta nidaamyada xanuunka ayadoo uu kormeeraayo farmashiiste iyo shaqaale tababar karti badan leh u qaba si loo siiyo daryeelka ugu tayada badan ee suuragalka ah. Qorshaha daryeelka ayaa lagu dhisaa heerarka cadeynta ku dhisan ee daryeelka iyo farsamada ugu fiican. Xogta caafimaadka ee cadeynta ku saleysan iyo xogta xanuunnada guud, cudurada la helay iyo daawaynta xanuunnada iyo caawimaado ayay heli karaan bukaannada, dhakhaatiirta daawada qora, iyo daryeel bixiyaashu marka ay gudbiyaan codsi qoraal ama hadal ah.
  - Dhammaan bukaannada ayaa si otomaatig ah looga diiwaan gelin doonaa Barnaamijyada Maareynta Bukaanka. Marka aad ka qaybgasho barnaamijkaan, waxaad heli doontaa qiimeyn hore oo uu samaynaayo farmashiile kaasoo ku bari doona sida qaab sax ah loogu qaato daawada (inta jeer, qaabka, iyo kuurada), kuu sheegaaya cilado kasta oo ka dhalan kara, hubinaaya isdhexgallada labada daawo ama daawada iyo xanuunka, xasaasiyaadka daawada, kaana caawinaaya xal u helida walaacyo kasta. Si aad u hesho jawaabta su'aalaha caafimaadka ee quseeya daawooyinkaaga, xanuunka, ama qorshaha daryeelka, farmashiisteyaasha ayaa diyaar kuu ah 24 saac maalintii, 7 maalmood asbuucii lana heli karaa 365 maalmood sanadkii adoo wacaaya 612-873-2070 ama 877-993-3344 ama toos noogu imaanaaya inta lagu jiro saacadaheena caadiga ah ee shaqada.
  - Faa'iidooyinka Barnaamijyada Maareynta Bukaanka waxaa ku jira:
    - Aqoonta kor loo qaaday ee adeegsiga iyo qaadashada daawada.
    - Kor u qaadista ku dhaqanka daawada ayadoo la abuuraayo qorshaha daryeelka gaarka ah oo kugu haboon.
    - Tallo ku aadan maareynta ciladaha ka dhalan kara.
    - Abuurista maareynta iskaa ah ee daawooyinka iyo xanuunka.
  - Haddii aad dooneyso inaad ka baxdo, waad noo soo sheegi kartaa. Waad ka bixi kartaa walina waad helaysaa wicitaannada xasuusinta dib u buuxinta daawada.

- **Macluumaadka Dhaqaalaha**
  - Kahor inta aan daryeelkaagu bilaaban, shaqaale ka tirsan farmashiyaha ayaa kuu sheegi doona qarashka aad jeebkaaga ka dhiibayso sida lacagaha caymisku goosto, qaybta qarashka, iyo qaybta caymisku dhiibaayo.
  - Waxaan codsiga qarashka u diri doonaa shirkadaada caymiska caafimaadka haddii codsigaaga la diidana, shaqaale ayaa kuu shegei doona si aan uga wada shaqeyno xal u helida cilada. Waan kuu sheegi doonaa farmashiyuhu ku jiro ama uusan ku jirin caymiska.

- Waxaan ku siin doonaa qiimaha kaashka ee daawadaada marka aad codsato.
- Kooxdeenu waxay la xiriiri kartaa barnaamijyada kaalmada dhaqaalaha si loo xaliyo caqabadaha dhaqaalaha ee ku gudban inaad daawooyinkaaga biloowdo. Barnaamijyadaan waxaa ku jira boonooyinka qiimo dhimista ee shirkadaha daawada iyo caawimaad aad ka helayso haayadaha kala duwan ee maareynta xanuunka. Waxaan kaala shaqeyn doonaa inaan ku siino tilmaan ku aadan iska diiwaan gelinta barnaamijyada noocaas ah, marka la heli karo.

- **Soo Qaadashada Daawooyinka Laguu qoro - Gaynta ama Soo Qaadashada**
  - Waxaad haysataa dookha aad daawooyinkaaga ku soo qaadan karto ama laguugu gaynaayo si bilaash ah goob amaan ah oo aad doorataty. Ilaalinta xogtaada caafimaadku waa mid kamid ah muhiimadaheena ugu waawayn marka daawadaada ayaa keliya loo dhiibi doonaa qof aad u ogolaatay. Adiga ama qof aad u ogolaatay ayaa si raaxo leh bilaa balan noo imaan kara Isniinta-Jimcada. Fadlan eeg saacadaheena shaqada.
  - Fadlan fur dalabkaaga oo eeg waxyaabaha ku jira isla markaba kadib marka aad hesho si aad u xaqiijiso in dalabkaagu saxan yahay uuna dhamaystiran yahay. Waxaan kugu dhiiri gelinaynaa inaad daawadaada geliso meel sax ah sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah. Fadlan Nagala Soo xidhiidh 612-873-2070 ama 877-993-3344 hal maalin oo shaqo gudaheed si aad u soo sheegto agabka maqan ama waxyeeloobay.

- **Helitaanka Dib u Buuxinta**
  - Dib u Buuxinta daawada ayaa ah mid fudud marka aad adeegsato Adeegyada Farmashiga Taqasuska ee HCMC. Xubin kamid ah shaqaalaha farmashiyaha ayaa kula soo xiriiri doona 5-7 maalmood kahor maalinta laguu buuxinaayo daawada si uu kuugu balamiyo daawo buuxinta, u go'aansho ku dhaqankaaga daawaynta laguu qoray, kaala hadli doona ciladaha ka dhalan kara, qiimeyn doona isbadello kasta oo ku dhacay xanuunkaaga iyo/ama muunnada, uruurin doona lacago kasta oo qayb lagaa bixinaayo, kuu mudeyn doonta taariikhda qaadashada ama gaynta daawada ciwaan haddii aad doonayso in laguu geeyo. Waad nasoo wici kartaa waxaadna la hadli kartaa xubin kamid ah kooxda farmashiga si looga shaqeeyo codsigaaga dib u buuxinta.
  - Haddii aan awoodi wayno inaan kula soo xiriirno si aan kaagala shaqeyno buuxinta, fadlan wac oo waydii shaqaalaha farmashiga. Farmashiyaha ayaan diri doonin daawada buuxinta ah asagoon marka hore kaa xaqiijin.

- **Wareejinnada Daawada**
  - Haddii farmashiyaheenu uusan hadda kadib bixin daawadaada, farmashiilaha ayaa u wareejin doona daawadaada farmashiye kale. Waan kuu sheegi doonaa wareejintaan daryeelka.
  - Fadlan nasoo wac haddii aad dooneyso inaad ka hesho daawadaada farmashiye kale. Waxaan kaa caawin doonaa wareejinta daawada oo loo wareejinaayo farmashiye aad doorataty.

- **Isku badelidda/Isku Dhigmida Daawada**
  - Farmashiyaheena ayaa ku dedaalaaya inuu kuu helo dookha ugu qiimaha macquulsan. Mararka qaar, waxaa muhiim noqon karta in la isku badelo daawooyinka guud ee kala duwan ama nooca magaca dookha daawada. Tan ayaa dhici karta sabab la xiriirta shirkadda caymiska oo sidaas doorata ama si loo yareeyo lacagta qaybta aad bixiso. Haddii badelid loo baahdo in la sameeyo, xubin kamid ah shaqaalaha farmashiga taqasuska ayaa kula soo xiriiri doona kahor inta aan la dirin daawadaada si laguugu sheego badelka. Marka la heli karo, farmashiyaheena ayaa kuu diiwaan gelin doona daawada guud si lacag laguugu badbaadsho. Waxaan adeegsan doonaa daawada sumadda uu codsado adiga ama dhakhtarkaagu.

- **Tuurista Saxda ah ee Daawooyinka aan La Isticmaalin**
  - Si loo yareeyo waxyeellada ka imaan karta u banbixida lama filaanka ah, waa muhiim in si sax ah loo tuuro daawada aan la isticmaalin. Haku falaashin daawooyinka siinka ama musqusha.
  - Si aad u hesho tilmaamo ku aadan sida saxda ah ee aad u tuurayso daawo aadan isticmaalin, ka eeg webseedka adeegga qashin uruurinta ee deegaankaaga. Waxaad sidoo kale booqan kartaa webseedyada soo socda si aad u hesho xog dheeraad ah:
    1. FDA: Meesha iyo Qaabka Loo Tuuro Daawada aan La Isticmaalin - https://www.fda.gov/consumers/consumer-updates/where-and-how-dispose-unused-medicines
    2. Bokiska Qashinka lagu rido ee Rx: https://www.rxdrugdropbox.org/
    3. Qasacyada daawada lagu rido oo ku yaala Farmashiyaasha Hennepin Healthcare: Clinic & Specialty Center Pharmacy, Heerka 1 ama Shapiro Pharmacy, Heerka Hoose

- **Dib u Celinta Daawada**
  - Haddii daawadaada la codsado in la soo cesho, farmashiyaha ayaa kula soo xiriiri doona si laguu siiyo tilmaamo sida ay amartay FDA ama shirkadda daawada samaysay. Haddii daawo badel ah loo baahan yahay, waxaan kala shaqeyn doonaa dhakhtarkaaga si aad u hesho dookh la aqbali karo.

- **Helitaanka Daawooyinka Inta Lagu jiro Xaalad degdeg ah ama Masiibo**
  - Haddii la galo xaalad degdeg ah ama masiibo ka dhacdo deegaankaaga, fadlan la xiriir farmashiyaheena si aad noogu sheegto sida loo gaynaayo daawadaada.
  - Haddii farmashiyaha ay saamayn kasoo gaari karto xaalad degdeg ah ama masiibada, waa lagula soo xiriiri doonaa si lagaagala hadlo suuragalnimada wareejinta daawadaada si loo hubiyo inaan daawadu kaa kala go'in.

- **Xasaasiyadda Xun**
    - Xasaasiyada daran ayaa lagu qeexaa "Calaamad kasta, astaan, ama cudur aan la doonayn ama loola qasdin oo si ku meel gaar ah uga dhasha adeegsiga daawada."
    - Haddii aad ka shakido xasaasiyad xun, fadlan la xiriir midkood farmashiyaasheena iyo dhakhtarkaaga. Hase yeeshee, haddii xaalad degdeg ah oo caafimaad dhacdo, fadlan wac 911 ama adeegga xaalada degdega a ee deegaankaaga si aad u hesho caawimaad degdeg ah.

- **Arimaha iyo Walaacyada Daawada**
    - Farmashiiteyaasha taqasuska caafimaadka ayaa eegi doona dhammaan daawooyinka si loo hubiyo badqabka iyo saxnaanta si waafaqsan farsamada ugu wanaagsan iyo sida laguugu qoray. Hase yeeshee, haddii aad ogaato wax cilado ah (tusaale: daawada khaldan, kuurada khadan, xadka khaldan ama aad ka shakido daawooyin been abuur ah) fadlan nala soo xiriir waaan baari doonaa waana sixi doonaa khaladka.
    - Waxaan doonaynaa inaad si buuxda ugu qanacdo adeegga aan bixino. Haddii adiga ama daryeelahaagu uu walaacyo qabo, fadlan nagala soo xiriir taleefanka, iimeylka ama qoraal ahaan noo soo dir si aan kaagala hadalno walaacyadaada.
    - Haddii aad dooneyso inaad codsato dib u eegista dheeraadka ah ee walaaca, waxaad la xiriiri kartaa:
        - Gudiga Farmashiyaha ee Gobalka Minnesota
            - Webseetka: Cabashooyinka / Gudiga Farmashiyaha ee Minnesota (mn.gov)
            - Iimeylka: pharmacy.board@state.mn.us.
        - URAC
            - Gudbi Cabasho
                - Webseetka: https://www.urac.org/contact/file-a-grievance/
                - Ciwaanka IImaylka: grievances@urac.org

## XUQUUQAHA IYO WAAJIBAADKA TAQASUSKA EE BUKAANKA

**Adoo ah bukaankeena, waxaad XAQ u leedahay in:**

- Aad dalbato in xogtaada caafimaadka lala wadaago barnaamijka maareynta bukaanka keliya si waafaqsan sharciga gobalka iyo federaalka
- Inaad aqoonsato shaqaalaha barnaamijka, ayna ku jirto shaqadooda, iyo inaad la hadasho kormeeraha shaqaalaha haddii aad codsato
- Inaad la hadasho xirfadle caafimaad
- Inaad hesho xog ku saabsan barnaamijka maareynta bukaanka
- Inaad diido ka qaybgalka, ama iskaga baxdo, marka aad doonto

**Adoo ah bukaankeena, waxay MASUULIYAD kaa saaran tahay in:**

- Aad bixiso xogta saxda ah ee caafimaadka iyo xiriirka aadna keento ogeysiiska isbadellada ku dhaca xogtaan
- Inaad u sheegto dhakhtarka ku dawaynaaya ka qaybgalkiisa adeegyada uu baxshay farmashiyuhu, sida barnaamijka maareynta bukaanka

# Qorshaha U diyaar Garoowga Xaalada Degdega ah/Masiibada

Farmashiyaha ayaa leh qorshaha balaaran ee u diyaar garoowga xaalada degdega ah si uu kaaga caawiyo xaqiijinta daawaynta joogtada ah inta lagu jiro xaalada degdega ah ama masiibada sida daadadka daran, duufaannada, roobabka dabaysha wata, dhul gariirka, dabka, iyo fatahaadaha. Yoolkeena ugu muhiimsan waa in aan sii wadno buuxinta baahiyahaaga daawada. Marka ay jirto khatarta masiibada, waxaan ka shaqeyn doonaa xaqiijinta inaad hesho daawo kugu filan.

- Farmashiyaha ayaa ku soo wici doona 1-3 maalmood kahor xaalada degdega ah ee cimilada ee maxaliga ah ee la filaayo asagoo adeegsanaaya xogaha cimilada oo aasaas u ah tixraaca.
    - Haddii aadan joogin aaga maxaliga ah ee farmashiyaha laakiin aad dagan tahay meel waajahaysa masiibada cimilada waxaad masuul ka tahay inaad wacdo farmashiyaha 3-5 maalmood kahor inta aysan dhicin si aad ugala hadasho baahiyahaaga daawada.
- Farmashiyaha ayaa daawadaada ku soo diri doona alaab qaade ama UPS maalinta xigta si loogu keeno inta lagu jiro xaaladaha degdega ah ee cimilada.
- Haddii aan farmashiyuhu daawada kuu keeni karin karo inta aan xaalada degdega ah imaan farmashiyaha ayaa u wareejin doona daawadaada farmashiye kale, si aadan u noqon bilaa daawo.
- Haddii masiibo deegaanka ka dhacdo ama farmashiyuhu uusan ula xiriiri karin ama aadan la xiriiri karin farmashiyaha, fadlan dhagayso wсрarka deegaankaaga iyo xarumaha gurmadka si aad u hesho tallo ku aadan helitaanka daawada ama booqo isbitaalka deegaankaaga isla markaba.

Wac 911 ama tag qolka xaalada degdega ah ee kuugu dhow haddii aadan awoodin inaad la xiriirto farmashiga ayna kaa dhamaato daawadu.

# XOG DHEERAAD AH OO KU SAABSAN DAAWADAADA, XANUUNKA/CUDURKA LAGAA HELAY IYO KHAYRAADKA BULSHADA IYO DHAQAALAHA AYAA LAGA HELI KARAA WEBSEEDYADA SOO SOCDA:

| | |
|---|---|
| Xasaasiyada iyo Caafimaadka difaaca jidhka | https://www.aaaaifoundation.org |
| Cudurka Crohn's | http://www.ccfa.org/science-and-professionals/programs-materials/patient-brochures<br>http://www.crohnsonline.com<br>http://www.crohnsforum.com |
| Cudur la kala dhaxlo oo saameeya qanjidhada (Cystic Fibrosis) | https://www.cff.org/ |
| Cilada Hoormoonka Kobaca | http://www.hgfound.org |
| Hemophilia | https://www.hemophilia.org<br>https://www.wfh.org/en/home |
| Cagaarshoowga | http://www.liverfoundation.org<br>http://www.hepatitis-central.com<br>http://www.hepb.org/resources/printable_information.htm |
| HIV | https://www.hiv.gov<br>https://www.cdc.gov/hiv/basics/livingwithhiv/resources |
| IBD | https://www.crohnscolitisfoundation.org |
| Madhalaysnimada | https://resolve.org |
| Xanuunada Dufanka | https://www.lipid.org/foundations |
| Xanuunnada badan ee Myeloma | https://themmrf.org/multiple-myeloma/what-is-multiple-myeloma |
| Xanuunnada badan ee Sclerosis | http://www.mymsaa.org<br>http://www.msfocus.org<br>http://www.nationalmssociety.org |
| Caafimaadka Neerfaha | https://www.soc-neuro-onc.org/SNO/Resources/Patient_Resources/SNO/Resources/Patient_Resources.aspx |
| Daawaynta Kansarka/ Caafimaadka dhiiga | https://www.cancer.org<br>https://www.livestrong.org/we-can-help |
| Canbaarta (Psoriasis) | http://www.psoriasis.org |
| Dhiigkarka Sanbabka | https://phassociation.org/patients/aboutph |
| Xanuunka Tufta | https://www.rheumatology.org/I-Am-A/Patient-Caregiver/Diseases-Conditions/Rheumatoid-Arthritis<br>http://www.rheumatoidarthritis.com<br>http://www.arthritis.org |
| Talaalka Unugta Adkaha ah ee Jirka | https://transplantliving.org |
| Talaalka Dhuuxa | https://www.asbmt.org/patient-education/external-resources |

## Barnaamijyada Caawimaada Dhaqaalaha

**PAN Foundation: www.panfoundation.org**
**HealthWell Foundation: www.healthwellfoundation.org**
**Patient Services, Inc.: www.patientservicesinc.org**
**Patient Advocate Foundation Co-Pay Relief: www.copays.org**
**Partnership for Prescription Assistance: www.pparx.org**
**Safety Net Foundation: www.safetynetfoundation.com**
**The Assistance Fund: www.theassistancefund.org**

## Kala Duwanaanta, Sinnaanta, iyo U dhammaanta (DEI) ee Bukaanka

Adeegyada Farmashiga Taqasuska ee HCMC waxay doonaysaa inay xaqiijiso in dhammaan bukaannada ay helaan helitaanka loo siman yahay ee daryeelka tayada leh, ayadoo aan loo eegayn asalkooda ama sifooyinka. Waxaan aqoonsan nahay aana qadarinaynaa kala duwanaanta bukaannada, anagoo xalinayna caqabado kasta oo xadidi kara daryeelka, oona abuurayna goob loo dhan yahay oo dhammaan bukaannadu dareemayaan soo dhawayn iyo qadarin.

Qaybaha Muhiimka ah ee DEI-ga Bukaanka daryeelka caafimaadka waxaa kamid ah:

- Helitaanka Daryeelka: Waxay xaqiijisaa in dhammaan bukaannada, ayadoo aan loo eegayn xaaladooda dhaqan dhaqaale, isirka, asalka, ama sifooyin kale, ay helaan daryeel caafimaad oo tayo leh.
- Ilaalinta Dhaqanka: Aqoonsiga ah in aan u adeegno bukaanno kakala socda asallo kala duwan kuwaas oo soo mari kara jugta madaxa, soo maray khibradaha kala duwan ee nolosha iyo taariikhaha. Hormarinta fahan ku aadan dhaqanka iyo qadarinta fikradaha, mabaadii'da, iyo farsamooyinka dhaqanka ee bulshada bukaannada kala duwan.
- Helitaanka Luuqada: Bixinta helitaanka adeegyada fudud, sida turjumaannada iyo agabka turjuman, si loo xaqiijiyo in dhammaan bukaannadu ay si hufan ula hadli karaan dhakhaatiirtooda.
- Kala Duwanaanta Caafimaadka: Ka shaqeynta xalinta iyo yareynta ciladaha kala duwanaanta caafimaadka ee u dhexeeya bukaannada kala duwan, ayna ku jiraan kuwa lagu saleeyay isirka, qoomiyada, iyo xaalada dhaqan-dhaqaale.
- Goob Loo Dhan yahay: Abuurista goob caafimaad oo soo dhawayn leh loona dhan yahay taasoo qadarinaysa oo ilalainaysa mabaadii'da dhammaan bukaannada kala duwan.

Adeegyada Farmashiga Taqasuska ee HCMC ayaa muhiimada saaraaya muhiimad siinta DEI-ga bukaanka ee daryeelka caafimaadka si kor loogu qaado natiijooyinka, loo yareeyo ciladaha kala duwanaanta caafimaadka, korna loogu qaado nidaamka caafimaadka oo sinaan iyo u dhamaan leh.